



## Ku Xirnow munaasabadaha barbaarintu way socdaan

Waalidiinta ay gaartay xilligii ay ilmahooga u diri lahaayeen dugsiga markii u horraysay, barbaarintu waxay ugu muuqan kartaa mushkilad cabsi leh. Laakiin haddii aad haysato ilme ka dhigan doona barbaarinta Dugsiyada Dadweynaha Portland dayrta, munaasabadahayaga Ku Xirnow Barbaarintu waxay gacan ka gaysan karaan fududaynta kala-guurka.

Ku Xirnow Barbaarinta, taasi oo bilaabantay bishii hore, waa munaasabado taxane ah oo u furan qoysaska ardayda gali rabta barbaarinta, halkaasi oo waalidiinta iyo wakiiladu ay sahamin karaan fasalada, macallimiinta la kulmi karaan, su'aalahaaga lagaga jawaabi karo oo aad iska diiwaangalin karto dugsii.

Booqo [Web-beyjka Ku Xirnow Barbaarinta](#) si aad u hesho taariikhaha, wakhtiyada iyo macluumaad kale, sida haddii daryeelka ilmaha la heli karo. Taariikhaha waxa laga ogaan karaa dugsiga xaafaddaada, iyo sidoo kale ikhtiyaarka diirad-saarka iyo dugsiyada [laba luuqadood wax lagu dhigto](#). Fadlan ogow in haddii aad jeclaan lahayd in ilmahaagu dhigto ikhtiyaarka diirad-saarka ama dugsi DLI ah, waa inaad dalbato inaad gasho qorituur ugu dambayn 5 Maarso si laguugu tixgeliyo. Fadlan [ka diiwaangali ilmahaaga barbaarinta](#) ugu dambayn 4 Maajo.

Marka laga tago munaasabadaha furan, qoysasku waxay dalban karaan inay kaqaybqaataan barnaamijka Kala-guurka Barbaarinta Xilliga Hore xagaagan. EKT waa barnaamij dugsiga ku-salaysan, qoyska diiradda saara oo xagaagii ah oo ka jira 14 dugsi, oo loogu talagalay inuu qoysaska ka caawiyo inay si meelmar ah dugsiga u bilaabaan. Barnaamijka waxa lagu qaban doonaa Boise-Eliot/Humboldt, César Chávez, Dr. Martin Luther King Jr., Harrison Park, James John, Kelly, Jason Lee, Lent, Rigler, Scott, Sitton, Vestal, Whitman iyo Woodmere.

Dalabyada EKT waxa dhawaan laga heli doonaa [web-beyjka barnaamijka](#). Waxa jiro boosas kooban oo la heli karo, qoysaskana waxa lagu kala faddili arrimaha mutaysiga sida dakhliga iyo waayo-aragnimada dugsiga xannaanada. Si ay uga qaybqaataan EKT, ardaydu waa inay dhiganayaan dugsiga xilliga dayrta.

Wixii su'aalo khuseeya arrimaha barbaarinta, la xiriira Nancy Hauth [nhauth@pps.net](mailto:nhauth@pps.net)